

## Macluumaadka ku saabsan WIDA ee Beddelka ACCESS



### Waa maxay WIDA ee Beddelka ACCESS?

WIDA ee Beddelka ACCESS waa qiimayn loogu talagalay bartayaasha Ingiriisiga ee naafada garaadka ugu weyn qaba. Waxay cabbirtaa xirfadaha luqadda Ingiriisiga ee dhanka dhegeysiga, akhrinta, ku hadalka, iyo qorista sida lagu qeexay heerarka Horumarinta Luuqadda Ingiriisiga ee WIDA. Heerarkan waxaa qaatay Minnesota oo wax ka qabata baahida luqadda ee heerarka nuxurka akadeemiyadeed ee gobolka.




### Yaa sameynaa WIDA ee Beddelka ACCESS?

Bartayaasha Ingiriisiga ah ee buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka gaarka ah ee ku qoran Qorshehooda Waxbarasho ee Shakhsi ahaaneed (IEP), oona ka diiwaangashan dugsiyada dadweynaha iyo kuwa charter-ka ee Minnesota, ayaa samaynaya WIDA Beddelka ACCESS.



### Maxay ardaydu u sameeyaan WIDA oo ah Beddelka ACCESS?

WIDA Beddelka ACCESS waxay siisaa ardayda fursad ay ku muujiyaan xirfadahooda luqadda Ingiriisiga. Macalimiinta iyo dugsiyadu waxay u isticmaalaan natiijooyinka si ay ugu wargeliyaan go'aamada ku saabsan yoolalka horumarinta luqadda shakhsi ahaaneed iyo si loo go'aamiyo taageerooyinka luqadda. Qoysasku waxay natiijada u isticmaali karaan inay ugu doodaan ilmahooda.



### Goorma ayaa la sameeyaa WIDA Beddelka ACCESS

WIDA Beddelka ACCESS waxa la sameeyaa sannad kasta ilaa ardaygu ka baxayo barnaamijkooda waxbarashada luqadda. Imtixaanka waxaa la sameeyaa dabayaaqada Jannaayo ilaa dhammaadka Maarso.



### Sidee ardaydu u sameeyaan WIDA Beddelka ACCESS?

WIDA Beddelka ACCESS waa imtixaan warqad ah. Ardaydu waxay si gaar ah ula samayn doonaan Beddelka ACCESS macalin